



# Maxakamad Uga Yeeris

Subpoenas

## Waa maxay maxakamad uga yeeris?

Waa amar maxkamadeed oo faraya qof:

- Inuu maxkamadda hor yimaado.
- Soo gaarsiiyo qoraalo uu hayo, ama waxyaabo maxkamaddu ama qof kale uu eegi **AMA**
- Kuwa sare ee kor ku xusan oo dhan.



## Maxaan yeelayaa haddii maxakamad uga yeeris la ii soo diro?

Si taxadar leh u akhri amarka maxkamad uga yeerista. Waxaa laga yaabaa in ay la socdaan tilmaamo la xiriira xilliga iyo goorta lagaa doonayo maxkamadda. Amarka maxkamad uga yeerista waxaa ku xusan dhawr qodob oo la doonayo in aad ogaato. Maclumaadkaas waa mid ku xiran cidda kuu soo dirtay.

### → Haddii uu amarka ka yimid maxkamadda:

Amarka maxkamad uga yeerista waa in ay ku cad yihiin magaca maxkamadda iyo magaca dacwadda, haddii ay la xiriirto dhageysi maxkamadeed, ama wareysi.

### → Haddii uu amarka maxkamad uga yeerista kaaga yimid qareen:

Maxkamad uga yeerista waa in ay ku jiraan magaca qareenka, lambarka qareenka, cinwaanka iyo telefoonka xafiiska, iyo cidda uu qareenku matalayo.

## Yaa i siin kara maxkamad uga yeeris?

Sharciyda u degsan in lagu soo “gaarsiiyo” maxakamad uga yeeris. Maxkamad uga yeeris waxaa kuu keeni (gaarsiin) kara xafiiska sheriffka ama qof kasta oo da’diisu ka weyn tahay 18 jir oo aan qeyb ka aheyn dacwadda.

## Yaan la xiriirayaa haddii aan su’aal ka qabo maxkamad uga yeerista?

Haddii aad wax su’aal ah ka qabto maxkamad uga yeerista, la xiriir qofka soo saaray maxkamad uga yeerista.

## Yaan la xiriirayaa haddii aan dhibaato kala kulmin raacista amarka maxkamad uga yeerista?

La xiriir qofka soo saaray maxkamad uga yeerista haddii:

- Haddii aad dooneysyo in turjubaan ama aad u dooneysyo fududeyn gaar ah naafanimo darteed
- Haddii aad dhibaato kala kulanto taariikhda balanta maxkmadda. Fiiro gaar ah: Waxaa laga yaabaa in qaaliga uusan bedelin taariikhda haddii aad weydiisato.

## **Amarka maxkamad uga yeerista waxaa loola jeedaa in aan imaado maxkamadda?**

Marmarka qaarkood. Waxaa laga yaabaa in aad ciqaab sharci ah ku mudato haddii aadan sameyn waxyaabaha uu amarku ku farayo. Waxaa lagugu qaadi karaa in aad ka hor timid amarka maxkamadda, qaalguna amri karaa in lagu soo xiro.

Maxkamad uga yeerista oo dhan ma amraan in aad maxkamadda timaado. Haddii aad wax su'aal ah ka qabto waxa lagaa doonayo, la xiriir qofka soo saaray maxkamad uga yeerista.

## **Waxa aan ka cabsanayaan haddii aan raaco amarka maxkamad uga yeerista in dhibaato xagga sharciga ah iga soo gaarto.**

### **Maxaan yeelayaa?**

Haddii aad ka cabsaneyso in dhibaato xagga sharciga ah kaa soo gaarto haddii aan raaco amarka maxkamad uga yeerista, si degdeg ah ula xiriir qareen. Haddii aad tahay qof laheyn sharci rasmi ah oo laguu soo diro maxkamad uga yeeris, si degdeg ah ula xiriir qareen.

- The Legal Rights Center (Degmada Hennepin)  
Soo booqo: [www.legalrightscenter.org](http://www.legalrightscenter.org) ama soo wac 612-337-0030.
- The Neighborhood Justice Center (Degmada Ramsey)  
Soo booqo: [www.njcinc.org](http://www.njcinc.org) ama soo wac 651-222-4703.
- The Indian Legal Assistance Program Barnaamijka Gargaarka Indiyaanka (Degmooyinka St. Louis, Carlton, Lake, Cook, Aitkin, Mille Lacs, Pine, Crow Wing iyo Morrison)  
Soo booqo: <http://ilap-duluth.com> ama soo wac 218-727-2881 ama 888-249-3205.
- The Regional Native Public Defense Corporation (Haddii aad ka tirsan tahay Qabiilada daga White Earth ama Leech Lake Reservations ama aad degan tahay degmooyinka Beltrami, Cass, Clearwater, Hubbard, Itasca, iyo Mahnomen)  
Soo booqo: <https://www.natedefense.org/> ama soo wac 218-339-5680 (Leech Lake) ama 218-983-3285 (White Earth).

*Xog Urursan oo ku saabsan macluumaadka sharciga MA AHA talo xagga sharciga. La tasho qareen. Ha isticmaalaan xogtan urursan haddi ay 1 sano ka soo wareegtay xilligii la daabacay. Weydiiso xogtii ugu dambeysay, liiska xogta urursan, ama aad ku hesho habab kale.*

© 2025 Minnesota Legal Services Coalition. Qoraalkan waa la sii badin karaa waxaana loo adeegsan karaa oo kaliya hab shaqsi ah iyo waxbarasho kaliya. Xuquuqda kale waa mid la dhawray. Ogeysiiskan waa inuu la socdaa nuqlu kasta oo la sii daabaco. Dib u daabiciddu, sii qeybinta, iyo in loo isticmaalo hab ganacsii ah waa mid si adag loo mamnuucay.